

Nofember,
2005

Daryeelka iyo Caafimaadka ilmaha

Xaashida Macluumaadka waalidka

Qoraalka iyo akhrintu waa qayb ka mid ah nolol maalmeedka

Far iyo akhrin barashadu waa qayb ka mid ah nolol maalmeedka qoysaska. Hadalada lagu hadlo iyo kuwa qoran waxaa loo isticmaalaa in lagu gudbiyo fikrado iyo dareen laguna wadaago xigmad. Waxaan isticmaalaa qoraal iyo akhrin marka lala hadlayo xubnaha qoyska iyo asxaabta, marka wax la gadayo, marka casho la karinayo iyo marka laga qaybgelayo hawlo madadaalo. Xubnaha qoysku door fiican bay ka cayaaraan xagga taakulaynta wax qorida iyo wax akhrinta markay qabsanayaan hawl maalmeedkooda. Marka lagu daro akhrinta buugta, carruurta waxay u baahan tahay inay bartaan in ay macne kala soo baxaan CD-ROMS, Fiidiyow, gaymamka kumbuyuutarka. Emails, rugaha internet-ka ku cayaarida ama ku wada xiriirida farrinta qoran ayaa iyaduna door ka cayaarta. Si joogta ah ula qaybsiga ilmahaaga buugta aad ayey muhiim u tahay, laakiin taasi waa mid ka mid ah khibrada akhris iyo farbarasho. Waxyaallaha kalena waxaa ku jira:

- Akhrinta iyo eegida calaamadaha, astaamaha iyo loogada – sida calaamadaha wadada, xayeysiiska, baakadaynta cuntada iyo astaanta dharka.
- Dhegaysiga sheekooyinka, laxanka heesaha iyo kaftanka
- Daawashada barnaamijka telefshanka, fiidiyaha iyo DVDs
- Akhrinta iyo dirida warqadaha, kaararka salaamaha, postcards-ka, fariimaha qoran ee SMS iyo email-da
- Ku cayaarida gaymamka
- Ka raadinta macluumaadka internetka
- Akhrinta iyo daawashada magaasiinada, wargeysyada iyo kaatalooga
- Cayaarida kaararka iyo gaymamka
- Sawirida iyo qorida iyadoo la isticmaalayo warqad iyo qalin rasaas iyo aalladaha kumbuyuutarka (Computer Software).



Dhamaan khibradaha wax-qorida iyo wax akhrintu waxay door ka qaataan ilmahaaga horumarkiisa fahamka iyo qadarinta doorka erayada nolol maalmeedkooda. Khibradaha kala duwani carruurta siyaalla kala duwan ayay u soo jiitaan, sidaas darteed waxaa jira fursada badan oo ku dhiirigeliya carruurtaada kuna abuura inay jeclaadaan akhrinta iyo qoritaanka.

Khibradaha carruurta leeyihiin maanta waa kuwa ka duwan kuwa aan lahayn carruurnimadeenii. Carruurta Australia ku kortay badankood waxaa hareeyey muuqaal qoran iyo luqada lagu hadlayo.

- *Ka feker tirada calaamadaha iyo macluumaadka ah lagu muujiyey dukaanka gudabiisa, ama markaad ku safrayso xaafadaada. Isku day inaad u isticmaasho calaamadahaas iyo macluumaadkaas ilmahaaga. U tilmaan erayada iyo sawirada. Ka badal waxaad aragtay.*
- *Waxaa laga yaabaa inaad aragto calaamado iyo macluumaad ku qoran af aan ka hayn Ingiriis. Ka badal calaamadahaas waxaadna cayaari kartaan gaym si aad malayso waxay leeyihiin.*

Horumar teknoolajiga ayaa keenaya in carruurta arkaan erayo qoran iyo kuwa lagu hadlayo qaab ka duwan sidii caadiga ahayd. Carruurta Australia badankood maanta waxay helli karaan kumbuyuutaro iyo aallad elektaroonig ah sida raadinta macluumaadka internetka, wax ka gadashada internetka iyo cayaarida gaymamka kumbuyuutarka.

- *Ilmahaagu ma jecel yabay inuu ku caawimo markaad isticmaalayso kumbuyuutarka? Qaado fursadaan si aad u weydiiso su'aallo ku saabsan waxay baranayaan iyo waxay arkayaan.*
- *Ilmahaagu ma arkaa adoo qoraya ama akhrinaya fariinta telefoonka SMS? Kala badal midaan taas oo ah si kale oo lagu wadaagi karo macluumaadka iyo sababta ay mubiimka u tahay inaad awoodo akhrinta iyo qoraalka.*

La wadaag erayada, sawirada kugu wareegsan, maadaama ay kulligood door ka qaadan karaan horumarka xirfada qorida iyo akhrinta ilmahaaga.

Dadaalka

Waxaa taageeray



SOMALI